


Tababarka Xalalka waara ee loogu talagay Bulshooyiinka uu Saamayey Barakaca ee Somalia Tababarka

Koorsada3aad. Kulanka 2aad: Guriyo Ka saarista xooga ah iyo sugnaanta mudada guriyo lahaanshaha ee Somalia

Soo Koobid

Koorsadan saddexaad waxay diiradda saaraysaa Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida, cabbir muhiim ah oo ku saabsan geeddi-socodka xalka waara. Kulanka labaad waxaan si qoto dheer u baari doonaa arrimaha sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha, qasab kaga saarida iyo dib u dejinta bulshooyinka uu saameyey barakaca ee Soomaaliya. Waxaan diirada saari doonaa siyaasadaha iyo tilmaamaha cusub ee ay qaadatay Dowlada Federaalka Soomaaliya si loo wanaajiyo sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha ee bulshooyinka uu saameyey barakaca, laga hortago ka saarida qasabka ah iyo in la hubiyo in guri ka saarida, markii daruuriri noqoto oo la cadeeyo, iyo qorshayo dib u dejinta loo fuliyo si waafaqsan heerarka caalamiga ah. Qaybta ugu dambeysa ee kulanka waxay u heellan tahay habka dejinta isku dhafan iyo ka mid noqoshada bulshooyinka uu saameyey barakaca iyo dejinta bulshooyinka uu saameyey barakaca iyo ku darista qorsheynta horumarinta magaalooyinka mustaqbalka fog.

Ujeedooyiinka

Dhamaadka kulanka, ka qaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Aqoonso caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha ee Soomaaliya
- Qeex waxa ay tahay qasab kaga saarida guriyaha.
- Qaddari baaxadda guryo ka saarista khasabka ah ee ka dhex jirta barakacayaasha ee Soomaaliya iyo saameynta ay ku leedahay xalalka waara.
- Sharax geedosocodka guryo ka saarista sharciga ah ee waafaqsan qodobada haga guriyo ka saarista qaranka.
- U raadi xalal arrimahan iyadoo loo marayo daraasada kiisas iyo casharro laga bartay.

Fariimaha Muhimka ah

1. **Sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha ayaa fure u ah xaqiijinta helitaanka xuquuqda guriyeyn, dhul iyo hanti iyo xalalka waara**

2. **Soomaaliya gudaheeda, waxaa ka jira caqabado badan oo hortaagan sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha ee barakacayaasha, oo ay ku jiraan xoog uga saarista dhulalka gaar loo leeyahay oo la haysto.**
3. **Bixinta kaalmo sharci, xoojinta nidaamka cadaalada ee aan rasmiga aheyn, bixinta dukumiintiyada sharciga ah ayaa ah qaababka lagu xoojinayo helitaanka sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha ay leeyihiin bulshooyinka uu saameyey barakaca ee Soomaaliya.**
4. **La shaqeynta ururada magaalooyinka ayaa cadeeysey inay gacan ka geysato yareynta dhacdooyinka ka guryo ka saarista qasabka ah iyo ku tumashada xuquuqda guryeyn, dhul iyo hanti.**
5. **Mas'uuliyiinta Soomaaliya ayaa dhawaanahan qaatay siyaasado lagu xoojinayo helitaanka sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha ee bulshooyiinka uu saameyey barakaca. Hirgalintoodu waxay muhiim u tahay horumarka dhinaca xalalka waara.**
6. **Habka isku dhafan ee dejinta iyo isku xidhka qorshaynta magaalooyinka si loo hubiyo ka mid noqoshada bulshooyinka uu saameyey barakaca ku aadan horumarinta magaalada ayaa xudun u ah qorshaynta xalalka waara ee mustaqbalka fog.**

Ogsoonow in casharada fududeynta iyo talooyinka iyo sidoo kale farriimaha muhiimka ayaa ku jira bog kasta oo ku jira sanduuqa qoraalka

Hababka Gudbinta Tababarka

Qaab Dhismeedka

Kulankaan wuxuu u qaybsan yahay afar qaybood oo waaweyn:

1. **Caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha ee Soomaaliya**
   Qaybtani waxay ku bilaabmaysaa hawl loo yaqaano "Saxan Kalluunka ah" oo ujeedadiisu tahay fududeynta wadahadalka u dhexeeya ka qaybgalayaasha ee ku saabsan caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha ee Soomaaliya, soo bandhigida aqoonta iyo ballaarinta fahamka wadajirka ah ee mawduuca. Labada bog ee soo socda waa soo koobitaankii arrimaha ay ahayd inay ka soo baxaan layliga.

2. **Guryo ka Saarista xoga/khasabka ah**
   Ujeeddada qaybtan waxay ka kooban tahay laba bog oo ujeeddadeedu tahay sharraxaadda waxa ay tahay guriyo ka saaris qasabka ah iyo baaxadda ay arrintan ku leedahay Soomaaliya.

Waad ku dari kartaa hal bog oo macluumaad dhowaan ama khaas ah oo ku saabsan guriyo ka saarida qasabka ah ee ka jira xaalada guud / goobta tababarka laga fuliyey

3. Qaab-dhismeedyada sharciga iyo siyaasadda

Ujeedada ugu weyn ee qaybtani waa in la soo bandhigo qaab-dhismeedyada siyaasadeed ee dhowaan la ansixiyay ee looga golleeyahay in lagu ilaaliyo sugnaanta mudada lahaanshaha guriyaha ay leeyihiin barakacayaasha iyo in laga hortago guriyo ka saarida sharci darrada ah. Runtii, guriyo ka saariddu waxaa lagu fulin karaa hab sharci ah, iyadoo la raacayo habraac lagu sharraxay tilmaamaha deegaan ka saarista Qaranka ee waafaqsan heerarka caalamiga ah. Hawl gaaban ayaa wuxuu ku hagi doonaa kaqeybgalayaasha ayadoo la raacayo talaabooyinka iyo xeerarka kala duwan si loo ixtiraamo in loo fuliyo geeddi-socodka deegaan ka saarista sharciga ah marka loo baahdo lana sababeeyo. Labada bog ee soo socda waxay muujinayaan tallaabooyin kale oo dhameystiraya si:

- looga hortago in si qasab ah lagu raro heer caasimad sida magaalada Baydhabo intii lagu jiray caabuqii Covid 19
- Tallaabooyin kale oo lagu xoojinayo sugnaanta mudada deganaanta deegaan ee mustaqbalka dhexe

Qaybta labaad ee qaybtani waxay ku saabsan tahay dib-u-dejin iyo helitaanka guryo aad u sii raagaya oo loogu talagalay barakacayaasha iyo qaxootiga soo noqday, iyadoo la waafajinayo hab-maamuuska ku-meel-gaarka ah ee ku saabsan Dhul-u-qaybinta lagu talagalay guriyeynta Dadka Qaxootiga ah ee Soo Noqday iyo Barakacayaasha ee u qalma. Halkan, fiiro gaar ah ayaa loo yeeshay muhiimadda hubinta in dib-u-dejin kasta ama qaybin dhul loogu talagalay guriyeyn lagu fuliyo wadatashi iyo ka-qaybgalka ay ku yeeshaan bulshooyiinka uu saameeyey barakaca iyadoo la raacayo mabaadi'da guriyeynta ku filan.

4. Ka mid noqoshada magaalooyinka iyo habka dejinta isku dhafan

Qeybta ugu dambeysa ee kulankaan wuxuu ku saabsan yahay is-dhexgalka mustaqbalka fog iyo ka mid noqoshada bulshada uu saameyey barakaca iyo degsiimooyinka bulshada uu saameyey barakaca ee magaalooyinka, iyo qorsheynta magaalooyinka si loo hubiyo is-dhexgal wax ku ool ah (dib) iyo xalal waara iyadoo iyadoo loo marayo helitaanka adeegyada iyo hab-nololeed. Dhammaan qiimeynta magaalooyinka ee lagu sameeyay qaab dhismeedka mashruuca midnimo waxay u ololeynayaan is-ku-darista qorshaynta horumarinta mustaqbalka fog ee magaalooyinka iyo kuwa degsiimooyiinkii hore iyo degsiimooyinka cusub ee la abuuray si looga fogaado joogtaynta iyo kororka xaafado isku-raranta aan rasmiga ahayn iyo kuwa aan haysan wax adeeg ah oo aan helin horumar iyo xalalka mustaqbalka fog.

Mudada

Kulankaan waxaa loo qorsheeyay inuu socdo hal saac iyo bar.

- Qiyaastii 30 daqiiqo casharka ugu horeeya oo ay kujiraan jimicsiga baaldiga kalluunka
- 10 daqiiqo oo ay leedahay qeybta labaad
- 10daqiiqo oo ay leedahay qeybta saddexaad
- 20 daqiiqo oo ay leedahay qeybta ugu dambeysa.

Hawlo

1. **Hawsha 1: Baaldiga Kalluunka**

- Beddel sida qolka loo dejiyey: Wadahadalka baaldiga kalluunka wuxuu u baahan yahay kuraas loo dhigay goobo ("baaldiga kalluunka ") iyo boos waasac oo ku filan oo ku hareeraysan oo ay galaan ka-qaybgalayaasha hadhay si ay ugu fiirsadaan waxa ka socda "kalluun-baaldiga."
- Kaqeybgalayaasha waxaa loo kala saaray koox goobada gudaha gasho iyo koox gasho goobada dibedda. Weydii 4 ilaa 6 kaqeybgalayaal inay fadhiistaan goobada gudaha ama baaldiga kalluunka, oo bilaabaan inay ka jawaabaan su'aasha ugu weyn oo haka doodaan 5 daqiiqo; Kaqeybgalayaasha goobada dibedda waxay dhageysanayaan dooda waxayna qoranayaan qoraal. 5 daqiiqo kadib weydii seddex ilaa afar kaqeybgalayaal oo ka mid ah kuwa goobada gudaha inay noolaadaan islamarkaan weyddii kaqeybgalayaasha ku hareersan ee raba inay ku biiraan goobada gudaha. Waad sameyn kartaa laba wareeg oo kale haddii aad dareento in kaqeybgalayaasha kale ay rabaan inay ku biiraan goobada gudaha oo ay keenaan arrimaha macaquul ah.
- Is-xog wareeysi: Ku qor arrimaha ugu muhiimsan ee soo baxaya mudada lagu guda jiro doodda warqadda isweydaarsiga oo weydii ka qaybgalayaasha inay saxaan ama dhammaystiraan liiska caqabadaha. Bogagga soo socda waxay u joogaan inay ku soo koobaan caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan sugnaanta mudada lagu nagaanaya meel ka mid ah Soomaaliya.

2. **Hawsha 2: talaabooyinka raritaanka sharciga ah. U dhig sida saxda ah!**

Daabac oo jar dukumintiga hawsha 2aad, isku qas qaybaha warqadda ah oo ku rid baqshado: kooxdiiba hal baqshad. Weydii koox kasta inay u dhigto talaabooyinka ka saarista sharciga ah sida saxda ah ee ay ukala horeyaan.

Diyaarinta

- ☐ Diyaarso qolka si loogu sameeyo jimicsiga baaldiga kalluunka ka hor intaadan bilaabin kulanka: wadahadalka baaldiga kalluunka wuxuu u baahan yahay kuraas loo dhigay goobo ("baaldiga kalluunka ") iyo boos waasac oo ku filan oo ku hareeraysan oo ay galaan ka-qaybgalayaasha hadhay si ay ugu fiirsadaan waxa ka socda "kalluun-baaldiga. ”
- ☐ Daabac dukumiintiga hawsha 2aad (kooxkiiba mid), jarjar isku qas waraaqaha oo ku rid baqshad: Hal baqshad kooxdiiba

Maqaalo Qoraal oo faa'iido leh

- ☐ TILMAAMAHA GUUD EE QARANKA ee boos ka raritaanka, Dowladda Federaalka Soomaaliya, 2019
- ☐ Hab maamuus kumeel gaar ah oo ku saabsan qaybinta dhulka ee loogu talagalay guriyeynta dadka qaxootiga ah ee soo laabtay iyo barakacayaasha u qalma, Dowladda Federaalka Soomaaliya, 2019
- ☐ Siyaasadda Qaranka ee ku saabsan Qaxootiga-soo-noqday iyo Barakacayaasha ku sugan Soomaaliya, Dowladda Federaalka Soomaaliya, 2019
- ☐ Tallaabooyinka la qaaday ee lagu taageerayo ka hortagga ka saarista khasabka ah boosaska ay dadku degan yihiin inta lagu gudajiray COVID-19, UNOCHA, 2020.
- ☐ Halista joogtada ah, musiibada soo socota: dacwada deg degga ah ee hakinta ka saarista khasabka ah boosaska ay dadku degan yihiin Soomaaliya, Kooxda Ilaalinta Abriil 2020
- ☐ Sahanka himilada ee ReDSS, Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida, 2020.
- ☐ XUQUUQDA GURYEYNTA, DHULKA IYO HANTIDA EE DUMARKA QAXAY EE SOOMAALIYA, NRC, 2016
- ☐ Casharrada laga bartay seddexdii EU RE-INTEG Consortia (EIDACS, JSC, SDSC), ReDSS, Oktoobar 2019
- ☐ Tilmaamaha Magaalada Kismaayo, Waraaqaha Shaqada iyo Falanqaynta Meelaha ee Qorshaynta Magaalada, Wasaaradda Howlaha Guud ee Jubaland, Dib u dhiska iyo Guriyeynta, Oktoobar 2020
- ☐ Culees aan loo baahnayn: boos Ka saaritaan qasab ah iyo Covid-19, qoraalka kooban ee NRC, Julaay 2020.

- ☐ Mabaadi'da Pinheiro Mabaadi'da Qaramada Midoobay ee Guryeynta iyo Soo Celinta Hantida ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha, 2005
- ☐ Mabaadi'da Hagaya ee Barakaca Gudaha
- ☐ Heshiiskii Kampala ee ku saabsanaa ilaalinta iyo kaalmaynta dadka ku barakacay gudaha Afrika
- ☐ Heshiiska OAU ee xukumaya waxyaabaha gaarka ah ee dhibaatooyinka qaxootiga Afrika
- ☐ Heshiiskii Jeneva ee 1951 iyo hab maamuuskii 1969kii
- ☐ Qaab dhismeedka IASC ee ku saabsan xalka waara ee dadka gudaha ku barakacay, 2010
- ☐ Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda, 1966
- ☐ Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, 1996
- ☐ Mabaadi'da Aasaasiga ah ee UN-ka iyo Tilmaamaha ku aaddan Ka-saaridda ku saleysan horumarka iyo Barakaca, 2007
- ☐ Mabaadi'da Hagayaasha ee UN-ka ee ku saabsan sugnaanta deganaashaha boos ee saboolka magaalooyinka, 2013
- ☐ Tilmaamaha khiyaariga ah ee Ururka Cunnada iyo Beeraha (FAO) ee ku saabsan Maamulka sugnaanta lahaanshaha boos, Dhul, Kalluumeysi iyo keymo, 2012
- ☐ Heshiiska ILO ee tirsigiisa yahay No.169 ee xuquuqda dadka asaliga ah
- ☐ Heshiiska baabi'inta dhammaan noocyada takoorka ee ka dhanka ah haweenka (CEDAW) iyo dhammaan hab maamuuskiisa